DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA

# Xeer-nidaamiyaha 5aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

# Anshaxa iyo Wax-ka-qabashada Anshax-xumada Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

**Tusmo**

***1. Hordhac*** ***1***
1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda 1
1.2. Mabaa'diida Hagaya 1
1.3. Waxa lagu maamulayo 1
1.4. Erey-bixinta 2
***2. Maareynta Hawl-qabadka*** ***3***
2.1. Mas'uuliyadda Maareynta 3
2.2. Tallaabo Anshax-marin 4
2.3. Qorshaha Sii-waajinta Hawl-qabadka 4
2.4. Caddaaladda Dabiiciga ah 4
***3. Anshax-xumo*** ***5***
3.2. Waajibnimada soo-sheegidda 5
***4. Ciqaabaha Ka Dhalanaya Anshax-xumada*** ***6***
4.3. Digniinta afka ah 6
4.4. Digniin qoraal ah 6
4.5. Shaqo ka hakin 7
4.6. Shaqo-ka-saaris/eryid 9
***5. Cabashooyinka iyo Rafcaannada*** ***10***
***6. Ansaxinta Xeer-nidaamiyaha*** ***10***

# 1. Hordhac

## 1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda

1.1.1. Xeer-nidaamiyahan waxaa la soo saarey iyada oo laga ambaqaadayo Qodobka 31aad, Faqradda 31.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

1.1.2. Xeer-nidaamiyahan waa "xeer la diidi karo" sida loogu qeexay Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 waxaana sida ay sheegayso faqradda 1.4.1(f) marayaa muddo aan ka badneyn toban (10) maalmood oo uu dib-u-eegis ku sameynayo Baarlamaanka

1.1.3. Xeer-nidaamiyahan waxaa uu sameynayaa habraacyada ay tahay in ay raacaan Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo Hay'adda Loo Shaqeeyo marka ay la tacaamulayaan anshaxa iyo wax-ka-qabashada anshax-xumada ee shaqaalaha rayidka ah ee dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

## 1.2. Mabaa'diida Hagaya

1.2.1. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa hagaya mabaa'diida naxariista, daah-furnaanta, bulsho-u-adeegga iyo ixtiraamidda ku kala-dambeynta maamulka, daacadnimada, sirnimada, anshax hawleed, hufnaanta, waxtarka, xirfadlenimo, xaq ku shaqeyn, sinnaan iyo hababka ugu wanaagsan ee hawlqabadka.

1.2.2. Dhammaan shaqaalahaa rayidka ah ee dowladda waa in loola dhaqmaa si waafaqsan jaangooyooyinka caddaaladda dabiiciga ah iyo habraaca caddaallada

1.2.3. Dhammaan shaqaalaha rayidka ah ee dowladda waa in ay ka go'naataa in ay waajibaadyadooda iyo mas'uuliyahooda uga soo baxaan si waafaqsan tilmaanta qoran ee shaqadooda iyo mabaa'diida, xeer-nidaamiyeyaasha, siyaasadaha iyo habraacyada lagu maamulo shaqaalaha rayidka ah ee dowladda.

1.2.4. Dhammaan shaqaalaha doorkoodu yahay maamul iyo maareyn waxaa saaran mas'uuliyad ah in ay si wax-soo-saar leh u maareeyaan shaqaalahooda.

## 1.3. Waxa lagu maamulayo

1.3.1. Marka laga reebo waxa xagga hoose lagu cayimey, xeer-nidaamiyahan waxaa lagu maamulayaa anshaxa iyo wax-ka-qabashada anshax-xumada dhammaan shaqaalaha maamulka iyo maareynta ee Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee waqti buuxa iyo kuwa waqti gaaban shaqeeya ee Dowlad-goboleedka Jubbaland oo mushaarkooda laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan.

1.3.2. Xeer-nidaamiyahan waxaa sidoo kale lagu maamulayaa shaqaalaha loo magacaabey jagooyin ka mid ah Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee

maaliyaddoodu ay bixinayaan deeq-bixiyeyaal, sida ku xusan Qodobka 22aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

1.3.3. Xeer-nidaamiyahan laguma maamulayo:

a) Xubnaha ka tirsan ciidanka booliska, ciidamada amniga, iyo ciidamada qalabka sida
b) Xubnaha garsoorka
c) Saraakiisha la soo doorto
d) Wasiirrada, Wasiir-ku-xigeennada iyo xubnaha golayaasha ama Guddiyada uu magacaabo Madaxweynaha
e) Shaqaalaha sharikaadka ganacsi ee ay dowladdu leedahay oo u shaqeeya qaab ganacsi
f) Shaqaalaha loo qorto Qandaraasyo Muddo Go'an socda si ay u bixiyaan adeegyo xirfadeed kuwaas oo ah kuwo gaar ah oo ka madax-bannaan hay'adda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
g) Shaqaalaha u shaqeeya qandaraasle ay dowladdu u qaadatey in uu bixiyo adeegyo.

1.4. <u>Erey-bixinta</u>

1.4.1. Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa, ereyadan waxaa ay yeelanayaan macnaha soo socda;

a) ***"Guddiga Rafcaanka***" waxaa loola jeedaa hay'adda uu Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah u magacaabo in ay dhegeysato rafcaannada ka dhanka ah ciqaabaha anshax-marinta ah ama cabashooyinka ka dhasha go'aamo ay gaartey Hay'ad Loo Shaqeeyo.

b) ***"Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed"*** waxaa loola jeedaa qof u shaqeeya Hay'ad Loo Shaqeeyo oo mushaarkiisa laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya sida ay dhigeyso faqradda 4.1e) ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

c) ***"Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda"*** waxaa loola jeedaa Shaqaalaha Rayidka ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu waxaa ay si waafaqsan qodobbada xeerkan u qabtaan dhammaan hawlaha fulinta iyo kuwa maamul iyo adeeg-bixin ee Dowladda.

d) ***"Guddiga"*** waxaa loola jeedaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee lagu dhisey Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

e) ***"Madax-Waaxeed"*** waxaa loola jeedaa waax heerkeedu gaarsiisan yahay Agaasime.

f) ***"Xeer la diidi karo"***waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye uu Baarlamaanku u haysto muddo cayiman oo uu kaga soo horjeesan karo (diidi karo) ka hor inta *Xeer-nidaamuyuhu* dhaqangal noqon.

g) ***"Hay'ad Loo Shaqeeyo"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad, wakaalad

ka tirsan Wasaarad, ama Guddi Madax-bannaan oo Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ka mid ah oo shaqaaleysta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

h) ***Qof Shaqaale ah"*** waxaa loola jeedaa Qof Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed ah oo ay shaqaaleysatey Hay'ad Loo Shaqeeyo..

i) ***"Madaxa Hay'adda Loo Shaqeynayo"*** waxaa uu macnaheedu yahay Agaasimaha Guud (Xoghayaha Joogtada ah) ee Wasaarad ama sarkaal gacanta ku haya hawlaha fulinta ee Hay'adda Loo Shaqeynayo

j) ***"Tilmaammo/amarro"***waxaa loola jeedaa xeerar, buugaag, amarro, dhabbe-tuseyaal iyo ogeysiisyo waxaana soo saara Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo u maraya Guddoomiyaha Guddiga. Tilmaamaha (amarrada) waxaa ay caadi ahaan tahay in islamarkaa ama waqti cayiman lagu fuliyo.

k) ***"Maareeye"*** waxaa loola jeedaa qofka sida tooska ah uu u hoos tago Qofka ka tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

l) ***"Wasaarad"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad ka mid ah Laanta Fulinta ee la dhisey iyada oo la raacayo dastuurka Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

m) ***"Caddaaladda Dabiiciga ah"***waxaa loola jeedaa in geeddi-socodyada anshax-marinta:

   i. Qofka shaqaalaha ah la siiyo fursad uu isku-difaaco ka hor inta aan go'aan laga gaarin arrintiisa iyo in lala socodsiiyo halka ay arrintiisu mareyso

   ii. Qofka arrinta gacanta ku hayo uu ahaado qof dhexdhexaaad ah, ku shaqeeya niyad-wanaag, oo go'aankana ku saleeya caddeynta la hayo.

n) ***"Xeer-nidaamiye"***waa *xeer la diidi karo* oo bixinaya xeerar faahfaahsan oo uu diyaariyo uuna soo saaro Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si loogu hawlgeliyo waxyaabaha uu dhigayo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee 2017. Xeer-nidaamiyeyaashan waa kuwo ay waajib tahay in loo hoggaansamo laakiin ma aha Xeer uu soo saarey Baarlamaanka.

# 2. <u>Maareynta Hawl-qabadka</u>

2.1. <u>Mas'uuliyadda Maareynta</u>

2.1.1. Waa mas'uuliyad saaran dhammaan maareeyeyaasha in ay hubiyaan in hawl-qabadka shaqaaluhu uu gaarsiisan yahay heerkii laga rabey.

2.1.2. Si ay shaqaalaha hawshooda gacan ugu siiyaan maareeyayaasha waa in ay shaqaalaha siiyaan:

a) Barnaamij indho-fur ah oo ay ku jiraan in loo sharxo siyaasadaha, habraacyada iyo xeerarka anshaxa.

b) Tilmaanta shaqada oo qoran.

c) Sharaxaad cad oo ku saabsan waxyaabaha laga filayo iyo natiijooyinka looga fadhiyo.
d) Jawaab-celin joogto ah oo laga siiyo hawl-qabadkoodu
e) Tababar.
f) Dhiirrigelin iyo abaalmarinno ay ka mid yihiin dhiirrigelin iyo abaalmarin aan maaliyad ahayn.

2.2. <u>Tallaabo Anshax-marin</u>

2.2.1. Marka qof shaqaale ah uusan ka soo bixin heerkii shaqada ee laga filayey markaa maareeyaha uu tooska u hoos tago qofka shaqaalaha ah ayaa mas'uul ka ah in uu qaado tallaabo sixitaan oo ay ka mid noqon karto tallaabo anshax-marin ah.

2.2.2. Tallaabo anshax-marin ah waa in aan loo adeegsan keliya ciqaab ahaan, laakiin in loo adeegsado in lagu sii wanaajiyo hawl-qabadka ama hab-dhaqanka qofka halkii ay suuragal tahay.

2.2.3. Anshax-xumada yaryar waa in la ogaadaa oo waxna laga qabtaa goor hore inta aaney noqon mid ba'an. Halkii ay ku habboon tahay, qofka shaqaalaha ah waa in la siiyaa waqti iyo gacan-qabasho ku filan si uu isugu dayo in uu sii wanaajiyo waxqabadkiisa ama hab-dhaqankiisa ka hor inta aan laga qaadin tallaabo anshax-marin ah.

2.2.4. Maareeyaha ayaa ay mas'uuliyaddiisu tahay in uu xusuus (tixraac) ka reebo xiriirka isgaarsiineed ee uu la yeesho shaqaalaha marka waxa laga wada hadlayaa uu la xiriiro welwel laga qabo hawl-qabadka qofka. Tani waa caddeyn muhiim ah haddii tallaabo anshax-marin ah ay lagamamaarmaan tahay, iyo haddii Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda uu caddeyn dad uga baahan yahay haddii ay dhacdo in qofka laga saaro shaqada.

2.3. <u>Qorshaha Sii-waajinta Hawl-qabadka</u>

2.3.1. Haddii ay dhacdo in uu liito hawl-qabadka qofka, markaa maareeyaha qofka shaqaalaha ah waxaa uu go'aamin karaa in loo baahan yahay in uu qofka shaqaalaha ah kula heshiiyo **Qorshe Sii-wanaajin Hawl-qabad** (eeg Foomka 5.3, ee la socda Tilmaanta E ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah eeDowladda).

2.3.2. Halka qorshe sii wanaajin hawl-qabad lagula heshiiyo qof shaqaale ah, waa in nuqulka qorshahaloo diraa Qaybta Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed si loo geliyo galka shaqada ee qofka shaqaalaha ah.

2.3.3. Qaybta Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed waa in ay nuqul ka mid ah qorshaha sii wanaajinta hawl-qabadka u gudbisaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si ay diiwaankooda u gashadaan.

2.4. <u>Caddaaladda Dabiiciga ah</u>

2.4.1. Marka ay yimaadaan arrimo la xiriira anshaxa, qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha waa in loola dhaqmaa si caddaalad iyo sinnaan ay ku dheehan

tahay, oo waafaqsan jaangooyooyinka caddaaladda dabiiciga ah iyo habraac caddaalad ku dhisan.

# 3. Anshax-xumo

3.1. Sida ay dhigeyso Wareegtada lagu dhisey Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda Qaybta 6aad, Qodobka 28aad, Faqradda 28.1 anshax-xumada waxaa ka mid ah arrimahan soo socda laakiin kuma koobna kuwaan oo keliya:

a) Shaqada oo laga maqnaado iyada oo aan fasax qoraal ah laga haysan Hay'adda Loo Shaqeeyo ama aan la haysan qiil caqligal ah

b) Shaqada oo laga soo daaho;

c) Goobta shaqada oo laga maqnaado saacadaha shaqada iyada oo aan fasax loo helin;

d) In si lagu qanci karo uu qofka Shaqaalaha ahi uga soo bixi waayo waajib laga sugayey;

e) Qofka oo waajibaadkiisa si hufan u gudan waaya taasna ay ka dhalatey isticmaalidda aalkolo (khamri) ama maandooriye;

f) Isticmaalidda, iyada oo aan oggolaansho looga helin Hay'adda Loo Shaqeeyo, hanti ama tas-hiilaad ay leedahay Hay'adda Loo Shaqeeyo iyada oo loo adeegsanayo ujeedddooyin aan xiriir la lahayn waajibaadka rasmiga ah;

g) Inuu galo shaqo ka baxsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyada oo aan oggolaansho laga helin Hay'adda uu u Shaqeeyo;

h) Amar-diiddo ama caasigarow ama ku kicidda fal kasta oo fallaaganimo ah;

i) In uu si aan habbooneyn uga faa'iideysto jagada uu ka hayo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda;

j) Ku-kicid ama iska indho-tirid hab-dhaqanno tuuganimo, khayaamo ama musuqmaasuq ah;

k) Ku-kicid ama iska indho-tirid Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ku keeneysa sharaf-dhac;

l) Bixinta macluumaad shakhsi ah ama sir ah oo uu heley intii uu ka tirsanaa Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda;

m) Dayacaad ku keeneysa in ay wax uga lumaan Hay'adda uu u Shaqeeyo;

n) Dayacaad weyn oo uu dayaco ka soo bixidda waajibaadkiisa;

o) Weydiisashada ama aqbalidda abaalmarin maaliyadeed ama haddiyado aan loo fasaxin oo uu ku qaato qabashada hawlaha Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

3.2. <u>Waajibnimada soo-sheegidda</u>

3.2.1. Shaqaalaha waxa ku waajib ah in ay soo sheegaan anshax-xumada dhacda.

3.2.2. Hay'adda Loo Shaqeeyo, Guddiga, iyo saraakiisha la soo doorto, iyo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee kale waxaa ku waajib ah in ay ilaaliyaan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo soo sheega anshax-xumo dhacdey.

# 4. Ciqaabaha Ka Dhalanaya Anshax-xumada

4.1. Haddii ay anshax-xumo dhacdo waxaa la soo rogi karaa ciqaabahan soo socda:

a) Digniin af ah
b) Digniin qoraal ah
c) Shaqo ka hakin
d) Shaqo ka-saaris/eryid.

4.2. In kasta oo ay wanaagsan tahay in la maro geeddi-socod lagu bixiyo hal digniin oo afka ah oo ay ku xigaan laba digniinood oo qoraal ah ka hor inta aan qof shaqo laga saarin/eryin, haddana xaaladaha qaar ayaa laga yaabaa in ay qiil u noqdaan in tallaabo taas ka xooggan la qaado. Xaaladaha noocaas ah, tirada digniinaha ka hor inta aan qofka shaqada laga eryin ayaa la yareyn karaa, ama waxaa qiil loo heli karaa in qofka islamarkiiba shaqada laga saaro iyada oo aan wax digniin ah la siinin.

4.3. Digniinta afka ah

4.3.1. Marka qof shaqaale ah uu ku kaco anshax-xumo yar oo aaney ka dhalaneynin dhibaato soo gaarta hawlaha Hay'adda Loo Shaqeeyo ama maamulka, markaa digniin afka ah ayaa uu Maareeyuhu siin karaa.

4.3.2. Marka digniin afka ah uu bixinayo Maareyaha waa in uu waxa laga doonayo u caddeeyaa qofka shaqaalaha ah oo uuna u sheegaa cirib-xumada ka dhalan karta haddii ay hawl-qabadkaa xun iyo dabeecad-xumadaa uu ku sii socdo.

4.3.3. Maareeyaha ayaa leh mas'uuliyadda in uu xusuus ka reebo wada-xiriir kasta oo lala sameeyo shaqaale marka laga hadlayo welwel laga qabo hawl-qabadka, isaga oo adeegsanaya **Foomka 5.1** ee la socda Tilmaanta E ee Guddiga Shaqalaha Rayidka ah ee Dowladda. Foomkan waa in ay saxiixaan qofka shaqaalaha ah iyo maareeyaha waana in hal nuqul loo diraa qaybta Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed si loo geliyo galka shaqada ee qofka shaqaalaha ah.

4.3.4. Qaybta Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed waa in ay hal nuqul oo ah qorshaha sii-wanaajinta hawlqabadka u gudbisaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si ay diiwaankooda u gashadaan.

4.3.5. Digniinta afka ah waxaa ay jireysaa muddo 12 bilood ah.

4.4. Digniin qoraal ah

4.4.1. Digniin qoraal ah waxaa laga soo saari karaa arrimahan soo socda:

a) Marka hawl-qabadka ama hab-dhaqanka qof shaqaale ah ee lagu qeexay Faqradda 3.1, uu sidiisii u sii xunyahay ka dib markii digniin afka ah la siiyey.

b) Marka qof shaqaale ah uu mas'uul ka yahay anshax-xumo dhexdhexaad ah oo aaney ka dhalan cawaaqib dhibaato weyn ku ah Hay'adda Loo Shaqeeyo. Xaaladda noocan ah digniinta afka ah looma baahna.

c) Marka hawl-qabadka ama hab-dhaqanka qof shaqaale ah, sida lagu qeexay Faqradda 3.1, uu sidiisii u sii xun yahay ka dib digniintii qoraalka ahayd ee koowaad, markaa digniin labaad oo qoraal ah ayaa la siinayaa.

4.4.2. Marka digniin qoraal ah ay ku habboon tahay arrinta sida lagu sharxay Faqradaha 4.4.1a), b) iyo c) markaa maareeyaha qofka shaqaalaha ah waxaa uu ku wargeliyaa Madaxa Waaxda waxaana uu ku talinayaa in qofka shaqaalaha ah la siiyo digniin qoraal ah.

4.4.3. Marka uu ku talinayo in qof shaqaale ah la siiyo digniin qoraal ah, maareeyaha waa in uu Madaxa Waaxda siiyaa warbixinqoraal ah oo faahfaahin ka bixineysa anshax-xumada iyo tallaabo kasta oo sixitaan ah oo hore loo qaadey.

4.4.4. Haddii, marka uu u fiirsanayo caddeynta la bixiyey, uu Madaxa Waaxda uu ku raaco in loo baahan yahay digniin qoraal ah, markaa waxaa uu diyaarinayaa waraaqda isaga oo adeegsanaya **Foomka 5.2** ee la socda Tilmaanta E ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda. Waraaqda asalka ah waa in loo geeyaa maareeyaha qofka shaqaalaha ah si uu ugu dhiibo qofka shaqaalaha ah.

4.4.5. Marka digniin qoraal ah la soo saaro, qofka shaqaalaha ah waxaa looga baahan yahay in uu kulan la yeesho maareeyaha uu tooska u hoos tago iyo Maareeyaha Qaybta Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed, kaas oo anshax-xumada lagagala hadlayo qofka shaqaalaha ah oo waraaqaha digniinta qoran ahna lagu siinayo qofka shaqaalaha ah. Warbixin laga diyaariyo kulankan iyada oo la adeegsanayo**Foomka 5.1** ee la socda Tilmaanta E ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, waa in la geliyaa gallka shaqada ee qofka shaqaalaha ah.

4.4.6. Nuqul waraaqda digniinta ah waa in loo gudbiyaa Agaasimaha Guud si loola socodsiiyo arrinta, waana in nuqul loo diro Qaybta Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed si ay u geliso galka shaqada ee qofka shaqaalaha ah.

4.4.7. Waraaq digniin ah waxaa ay jireysaa muddo **12 bilood ah**.

4.4.8. In uu ansaxiyo Madaxa Waaxda ma ahee, digniinta qoraalka ah ee labaad ee lagu tilmaamey Faqradda 4.4.1c), waa inloo tixgeliyaa in ay tahay digniinta kama-dambeysta ah ka hor inta aan lagu talin in shaqada laga saaro qofka shaqaalaha ah haddii uu hawl-qabadka liita ama hab-dhaqanka lagu qeexay Faqradda 3.1, ay sii socdaan.

4.5. <u>Shaqo ka hakin</u>

4.5.1. Shaqo ka hakin waa in muddo kooban la hakiyo qandaraaska shaqada, iyada oo qofka la siinayo kalabar mushaarka iyo gunnooyinka, ugu badnaan muddo laba bilood ah.

4.5.2. Haddii Madaxa Waaxda la ogeysiiyo anshax-xumo ba'an oo lagu eedeynayo qofka shaqaale ah oo ayna habboon tahay in baaris lagu sameeyo, markaa Madaxa Waaxda waxaa uu shaqada ka hakin karaa qofka shaqaalaha ah inta eedeynta la baarayo. Marka shaqo ka hakin la sameeyo waa in dadaal kasta lagu bixiyaa sidii baaritaanka loogu soo gabogabeyn lahaa sida ugu dhaqso badan oo uguna taabogalsan.

4.5.3. Xaaladaha ugu waaweyn ee ay lagamamaarmaanka noqon karto in shaqada laga hakiyo qof (sarkaal) shaqaale ah waa kuwan soo socda:

a) markaay sii joogista qofka shaqaalaha ah ay saameyn ku yeelaneysa baarista dembiga qofka lagu eedeeyey;

b) marka sii joogista shaqada ee qofka shaqaalaha ah ay halis gelineyso naf ama hanti;

c) marka Madaxa Waaxda uu u arko in ay u badan tahay in qofka shaqaalaha ah uu mar kale galo isla dembigaa lagu eedeynayo.

4.5.4. Haddii baaritaanka noocaas ah loo arko lagamamaarmaan, markaa Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo waa in uu maareeye ku habboon u magacaabo in uu baarista sameeyo. Halka ay ku habboon tahay, cid kale oo khabrad u lehayaa laga soo qaadan Wasaarad kale ama cid aan ka tirsaneyn Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda haddii loogu baahan yahay in ay taageerto ama sameyso baarista.

4.5.5. Marka la qaato go'aan qof shaqaale ah looga hakiyo shaqada inta uu baaritaanku socdo, Madaxa Waaxda waxaa uu kulan la yeelanayaa qofka shaqaalaha ah si uu u ogeysiiyo xaaladda, iyo si uu qofka shaqaalaha ah ugu dhiibo waraaq arrintaas sheegeysa, isaga oo adeegsanaya **Foomka 5.4** ee la socda Tilmaanta E ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

4.5.6. Marka la soo gebogebeeyo baarista, maareeyaha sameynaya baaritsta waxaa uu warbixin qoraal ah ka diyaarinayaa baarista taas oo ay la socdaan talooyin la xiriira tallaabada ku habboon ee ay tahay in la qaado ee ku saleysan waxyaabaha lagu soo ogaadey baarista, si uu uga fekero Madaxa Waaxda.

4.5.7. Haddii dhammaadka baarista Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo uu u arko in dembiga la caddeeyey, arrinta waxaa loo gudbinayaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si uu baaris dheeraad ah ugu sameeyo.

4.5.8. Natiijada ka soo baxda baarista Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ka dib, ayaa Guddoomiyaha Guddiga waxaa uu natiijada qoraal ku ogeysiinayaa Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo.

4.5.9. Haddii, baarista anshax-xumada dad lagu eedeeyey ka dib, Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda uu u arko in dembiga uu cad yahay, Guddoomiyaha Guddiga waxaa uu waraaq u diyaarinayaa qofka shaqaalaha ah ee ay khuseyso taas oo uu ku ogeysiinayo natiijada baarista iyo ciqaabta lagu xukumey. Nuqul waraaqda ah waa in loo diraa Qaybta Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed waana in la geliyaa galka shaqada ee qofka shaqaalaha ah.

4.5.10. Haddii gebogebada baarista, dembiga lagu caddeyn waayo, Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ayaa qoraal ku ogeysiinaya waxaana waajib ah in la siiyo dhammaan mushaarkii iyo gunnooyinkii u waajibey muddada uu ku jirey shaqo ka hakinta. Guddoomiyaha Guddiga ayaa sidoo kale amar ku bixin kara in la siiyo xaddi lacag kale oo mag ahaan loo siinayo qofka shaqaalaha ah.

4.6. <u>Shaqo-ka-saaris/eryid</u>

4.6.1. Waxaa qof shaqada looga saari karaa:

a) Marka hawl-qabadka ama hab-dhaqanka qofka shaqaalaha ah uu ku sii socdo sida lagu tilmaamey Faqradda 3.1, uu mar walba yahay mid liita ka dib markii la siiyey digniin af iyo qoraalba ah.

b) Marka qof shaqaale ah uu ku kaco anshax-xumo ba'an oo ay ka mid tahay laakiin aan ku koobneyn xatooyo ama falal kale oo anshax-xumo ba'an ah. Xaaladdan oo kale looma baahna in digniin horesiiyey.

4.6.2. Marka xaaladda qof shaqaale ah ay tahay sida lagu tilmaamey Faqradaha 4.6.1 a) iyo b), maareeyaha qofka shaqaalaha ah waxaa uu ku wargelinayaa Madaxa Waaxda waana in uu kula taliyaa in arrinta ay Hay'adda Loo Shaqeeyo u gudbiso Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si loo baaro oo haddii ay suuragal tahayna shaqada looga saaro.

4.6.3. Marka uu ku talinayo in shaqada cid laga saaro, maareyaha waa in uu Madaxa Waaxda uu siiyaa warbixin qoraal ah oo faahfaahineysa anshax-xumada iyo tallaabo kasta oo lagu saxayey ee horey loo qaadey.

4.6.4. Haddii Madaxa Waaxda uu taageero talada ah in laga saaro shaqada waxaa uu warbixinta maareeyaha oo ay ayidaaddiisa la socoto u gudbinayaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si uu uga fekero,

4.6.5. Marka uu ka fekero talada shaqo ka saarista ah ee lagu sharxay Faqradda 4.6.4, Guddoomiyaha Guddiga waxaa uu Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo qoraal ku ogeysiinayaa natiijada.

4.6.6. Haddii, ka dib marka uu ka fekero talada ah in shaqada looga saaro sida lagu sharxay Faqradda 4.6.5, Guddoomiyaha Guddiga uu ansaxiyo talada; Qofka shaqaalaha ah ayaa waxaa qoraal natiijadaa ku ogeysiinaya Guddoomiyaha Guddiga. Nuqulka waraaqda waa in loo diraa Qaybta

Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed waana in la geliyaa galka shaqada ee qofka shaqaalaha ah.

4.6.7. Haddii, ka dib marka uu ka fekero talada ah in shaqada looga saaro sida lagu sharxay Faqradda 4.6.5, Guddoomiyaha Guddiga uusan ansaxin talada; markaa Qofka shaqaalaha ah ayaa waxaa natiijada qoraal ku ogeysiinaya Guddoomiyaha Guddiga taas oo ay la socoto faahfaah dheeri ah oo ku saabsan ciqaabaha kale ee ku habboon.

4.6.8. Haddii xaaladda ay tilmaamayaan Faqradaha 4.6.6 iyo 4.6.7, qofka shaqaalaha ah looga baahan yahay in uu kulan la yeeshoa Madaxa Waaxda iyo Maareeyaha Qaybta Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed, kaas oo natiijada soo baxdey lagala hadlayo qofka shaqaalaha ah. Markaa waa in qoraal xusuus-qor ah laga sameeyaa kulanka iyada oo la adeegsanayo **Foomka 5.1** ee la socda Tilmaanta E ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, waana in la geliyaa galka shaqada ee qofka shaqaalaha ah.

4.6.9. Haddii ay dhacdo in qandaraaska shaqada la baabi'iyo, Qofka shaqaalaha ah waxaa la siinayaa mushaarka maalmihii uu shaqeeyey.

# 5. Cabashooyinka iyo Rafcaannada

5.1. Haddii qof shaqaale ah lagu qaadey anshax-marin ama laga saarey shaqada uu u arko in geeddi-socodka anshax-marinta ee ay tilmaantan bixineyso aan si dad ku filan loo raacin, ama talada Hay'adda Loo Shaqeeyo aan loo fulin si waafaqsan jaangooyooyinka caddaaladda dabiiciga ah iyo habraac caddaaladku dhisan, markaa waxaa uu rafcaan u qaadan karaa Guddiga si uu arrinta ugu baaro si waafaqsan Habraacyada Rafcaannada ee lagu cayimey faqradda 30.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

# 6. Ansaxinta Xeer-nidaamiyaha

6.1. Anniga oo adeegsanaya awoodaha ka Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland la iigu siiyey Madaxa V, Qodobka 19aad, Faqradda 19.1 ee Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 iyo Madaxa VIII, Qaybta 33aad, Faqradda 33.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017, waxaan soo saarey Xeer-nidaamiyahan oo dhaqangelaya taariikhdan soo socota.



Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya